Macluumaadka Caafimaadka ee Qarsoon Heshiiska Ogolaanshaha ama Ka-noqoshada

Confidential Health Information Consent Agreement or Withdrawal

Magaca Qoran ee Macmiilka	Taariikhda Dhalashada Macmiilka

Waxaa laguu direy barnaamijka Wanaagga Korsashada (FWB) si barnaamijkeenna uu ugu caawiyo adiga iyo dadka kale ee ku lugta leh daryeelkaaga in ay fahmaan baahiyadaada caafimaad. Inta aad ku jirto meelaynta guriga ka baxsan, waa muhiim in bixiyeyaasha adeegga daryeelkaaga caafimaad iyo dadka kale ee ku lugta leh daryeelkaaga in ay ka wada hadlaan isuduwidda daryeelkaaga caaafimaad. Mararka qaar, diiwaanadaada caafimaadka waxay ku jiri karaan nidaam kombiyuutar ama qoraal waxaanna ka mid noqon kaa macluumaad ku saabsan:

- Adeegyada qorsheynta qoyska ah sida xakameynta dhalmada iyo ilmo iska soo xaaqidda;
- Caabuqyada Galmada Lagu Kala Qaado (STI) waa caabuqyada ama xaaladaha aad ka qaadi kartid xiriirka galmo, horeyna loo oran jiray Cudurrada Galmada Lagu Kala Qaado (STD), iyo/ama HIV/AIDS; iyo/ama HIV/AIDS; iyo/ama
- Adeegyada iyo daawooyinka Caafimaadka Habdhaqanka / Dhimirka iyo/ama
- Adeegyada Xanuunka Isticmaalka Maandooriyaha

Maadaama noocyadan macluumaadka sirta ah ay yihiin kuwo gaar ah, bahwadaagta haysa macluumaadkaaga sirta ah lama wadaagi karaan dadka kale haddii aad oggoshahay, ama sharciga Gobolka Washington uu dhigayo in ay macluumaadka sirta ah ay la wadaagi karaan dadka kale mooyaane.

Haddii aadan sixiixin foomkan, waxaad weli awoodi doontaa in aad adeegyada ka hesho barnaamijka FWB. **Dhammaan dhallinyarada ay da'doodu ka weyn tahay 13 ee loo soo gudbiyay barnaamijkeenna waxaa la weyddiin doonnaa haddii ay doonayaan in ay saxiixaan foomkan haddii nooca macluumaadka sirta ah ee ku jira foomkan uu kugu dabaqmo ama haddii kale.**

Marka aan oggolaanshahan saxiixo, waxaan oggolahay in dadka aan foomkan ku tilmaamay ay oggolaansho u haystaan in ay eegaan macluumaadkeyga sirta ee gaarka ah. Waxayna ka tashan karaan dhexdooda si ay iigu caawiyaan maamulida daryeelka caafimaadkayga. Macluumaadkeyga sirta ah waxaa ka mid noqon kara diiwaannada ku saabsan jirrooyinka ama dhaawacyada aan hadda qabo ama aan horey u qabey. Diiwaannada waxaa ka mid noqon kara natiijooyinka baaritaanka (sida raajitooyinka iyo baaritaannada dhiigga), daawooyinka aan hadda qaato ama aan horey u qaatey, iyo diiwaannada laga helay booqashooyinka cusbitaallada, xafiisyada adeeg-bixiyaha ama xarumaha iyo/ama rugaha kale ee caafimaadka.

Waxaan fahamsanahay in aan oggolaanshaheyga la noqon karo waqti kasta aniga oo foomkan saxiixaya oo aan siinayo Shaqaalaheyga Kiiska ama barnaamijka FWB. Tani ma saameyn doonto macluumaad kasta ee horey loo wadaagey.

Qaybta 1aad:

Waxaan **oggolahay** in aan u oggolaado barnaamijka FWB in uu helo oo uu la wadaago macluumaadkeyga sirta ee hoos lagu calaamadeeyay Bixiyayaasha Adeegeyga iyo Dakhaatiirteyda oo ay ku jiraan Shaqaalaheyga Kiiska ee Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska (DCYF) iyo/ama Shaqaalaha Bulshada Qabiilka, Daryeelaheyga hadda, iyo Waalidka(-iinta) Carruurta Dhaley:

☐ Dhammaan diiwaannadayda macmiilka, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, Caafimaadka, Caafimaadka Taranka (sida, xakameynta dhalmada, uurka, iyo ilmo iska soo xaaqidda), diiwaannada daaweynta, oggaanshaha ama natiijooyinka baaritaanka HIV / AIDS iyo STD / STI (RCW 70.02.220), Diiwaannada Caafimaadka Dhimirka (RCW 70.02.230), iyo diiwaannada Xanuunka Isticmaalka Maandooriyaha (42 CFR Qaybta 2aad).

AMA (haddii Qaybta 1aad aan la buuxin, fadlan buuxi labada qaybood ee Qaybta 2aad)

Macluumaadka Caafimaadka ee Qarsoon
Heshiiska Ogolaanshaha ama Ka-noqoshada

Confidential Health Information Consent Agreement or Withdrawal

Qaybta 2aad: (Qaybaha 2A iyo 2B waa in la buuxiyaa)

2A. Waxaan **oggolahay** in aan u oggolaado barnaamijka FWB in uu helo oo uu la wadaago macluumaadka ku saabsan caafimaadkeyga ee xagga hoose lagu calaamadeeyay kaliya Adeeg-bixiyaha / Bahwadaagta xagga hoose lagu calaamadeeyay:

- ☐ Daaweynta, oggaanshaha ama natiijooyinka baaritaanka HIV / AIDS iyo STD / STI (RCW 70.02.220)
- ☐ Caafimaadka Taranka (adeegyada qorsheynta qoyska sida xakameynta dhalmada iyo ilmo iska soo xaaqidda)
- ☐ Diiwaannada Caafimaadka Dhimirka (RCW 70.02.230)
- ☐ Diiwaannada Xanuunka Isticmaalka Maandooriyaha (42 CFR Qaybta 2aad)

2B: Adeeg-bixiyayaasha / Bahwadaagta barnaamijka FWB uu diiwaanadaada la wadaagi karo (calaamadee dhammaan kuwa ku habboon):

- ☐ Bixiyayaasha Adeegga Caafimaadka
- ☐ Shaqaalaha Kiiska DCYF ee Hadda iyo/ama Shaqaalaha Bulshada ee Qabiilka
- ☐ Bixiyayaasha Caafimaadka Taranka
- ☐ Daryeealaha Hadda / Waalidka Korsashada / Daryeelaha Xididka ah
- ☐ Dhakhaatiirta Adeeg-Bixiyayaasha
- ☐ Waalidka(-iinta) Ilmaha Dhaley (qor magacyada koowaad iyo kuwa dambe):
- ☐ Waxkale (qor):

Waxaan sidoo kale **oggolahay** in bahwadaagta ku xusan foomkan ay macluumaadkeyga sirta ah la wadaagi karaan midba midka kale oo lama wadaagi karaan qof kasta ee aan ku xusnayn foomkan korkiisa. Waxaan beddeli karaa fikirkeyga waxaanna la noqon kartaa oggolaanshaheyga waqti kasta **aniga oo calaamadeynaya sanduuqa hoose (isticmaalaya DSHS 10-489 oo cusub), saxiixaya,** kadibna siinaya Shaqaalaha Kiiskeyga ama barnaamijka FWB. Tani ma saameyn doonto macluumaad kasta ee horey loo wadaagey. Xarfaha Hore ee Magacyada: _____

Haddii aan aniga horey ula noqdey mooyaane, macluumaadka saxda ah ee kor ku xusan waa mid ansax ah ilaa aan kaga baxo daryeelka korsashada, ama ilaa _____.
Taariikhaha Dhicitaanka

☐ Waxaan la noqdey oggolaanshaheyga. Fadlan buuxi qaybtan saxiixa ee soo socota.

Saxiix Macmiilka ama Wakiilka Sharciga ah ee Macmiilka	Taariikhda

Magaca Qoran ee Wakiilka Sharciga ah	Xiriirka uu Wakiilka Sharciga ah la leeyahay Macmiilka

Ogeysiis ku socda Helayaasha: Macluumaadkan ayaa lagaaga soo sheegay diiwaanno ay ilaaliyaan xeerarka sir ilaalinta ee federaalka, 42 Xeer-nidaamiyeyaasha Federaalka (CFR), Qaybta 2aad. Sharciyada dowlada federaalka ayaa kaa mamnuucaya in aad ku sameysid shaacin kasta oo dheeri ah macluumaadkan haddii shaacinta dheeriga ah uu si cad u oggolaanayo oggolaanshaha qoraalka ah ee qofka ay arrintu khuseyso ama si kale uu u oggolaadey dhinaca 42 CFR, Qaybta 2. Oggolaansho guud oo loogu talogalay sii daynta macluumaadka caafimaadka ama macluumaad kale **ma ahan** mid ku filan ujeeddadan.